

Barnaamajka Ilaalinta Baaritaanka  
Aadanaha (858) 246-4777  
  
(858) 246-3329 (FAKIS)

Jaamacadda Kalifornia, San Diego  
9500 Gilman Drive, Koodka  
boostada 0052  
La Jolla, CA 92093-0052

## **XUQUUQYADA QOFKA LAGU SAMEYNAAYO TIJAABO**

Kulliyada iyo shaqaalaha Jaamacadda Kalifornia, San Diego waxay rabaan inaad ogaato:

Qof walba laga codsado inuu ka qayb-qaato daraasad cilmi-baaris leh tijaabo caafimaad, ama laga codsadey inay wakiil ahaan u oggolaadaan qof kale, waxay xaq u leeyihiin in:

1. La ogeysiiyo ujeeddada iyo wuxuu ku saabsan yahay tijaabada.
2. Loo macneeyo hab-socodka la raacidoono markii la qabanaayo tijaabada caafimaadka, iyo daawada ama qalabka la isticmaali doono.
3. La siiyo sharaxadda dhibaatooyinka iyo halisyada macquul ahaan la filaayo inuu ka qayb-qaataha tijaabada dareemo.
4. La siiyo sharraxaad khuseeya faa'iidooyinka la filaayo in ka qayb-qaataha ka heloo baaritaanka, haddii uu dabakhmo.
5. La siiyo shaaca hab-socod walba ka duwan, daawoyin ama qalabyo oo faa'iido u lahaan doono ka qayb-qaataha, iyo halistooda iyo faa'iidooyinkooda.
6. Laguu sheego daaweynta kala duwan, haddii ay jiraan, iyo haddii uu heli karo ka qayb-qaataha tijaabada ka dib haddii dhibaatooyin ka dhashtaan.
7. Lagu siiyo fursad aad ku weydiiso su'aalo walbo khuseeya tijaabada ama hab-socodyada la samayn doono.
8. Lagu ogeysiiyo in ka qayb-galka tijaabada caafimaadka lala noqon karo waqti walba, iyo in qofka joojin karo ka qayb-galka tijaabada caafimaadka ayadoo waxba loo dhimayn.
9. Lagu siiyo nuqulka foomka oggolaanshada saxiixan iyo ku qoran taariikhda markii mid loo baahdo.
10. Lagu siiyo fursadda aad ku go'aamiso haddii aad oggoshahay iyo inkale ka qayb-galka tijaabada caafimaadka ayadoo wax xooga ah la isticmaalin sida, khiyaamo, qasbid ama raad ku yeelasho aan la rabin lagu sameeyo go'aanka ka qayb-qaataha.

Haddii aad su'aalo ka qabtid daraasadda cilmi-baarista, cilmi-baaraha ama kaaliyahiisa/kaaliyaheeda ayaa ku farxi doono inuu ka jawaabo. Waxaad macluumaad ka raadin kartaa Barnaamajka Ilaalinta Cilmi-baarista Aadanaha (Human Research Protections Program) - la aasaasey si loo ilaaliyo dadka si ikhtiyaar uga qayb-qato barnaamjyada cilmi-baarista - adigoo wacaaya (858) 246-4777 laga bilaabo 7:30subaxnimo ilaa 4:00duhurnimo, Isniin ilaa Jimco, ama adigoo u soo qoraaya cinwaanka kor ku xusan.